## XASUUSNOOW

### SGBV MAAHA khalad aad adigu gaysatay

Aduunyada oo dhan dumar, rag, gabdho iyo wiilal badan ayaa lakulma xadgudub jireed ama mid galmo ama noocyo kale oo SGBV ga ah intay nool yihiin. Qofkasta ayaa noqon kara dhibane loo gaystay rabshad galmo iyo mid jinsi laxariirta.

### Kaligaa MA tihid. Caawimaad ayaad heli kartaa

Waxaa jiro dad kucaawin kara, sida dhakhaatiirta, saraakiisha booliiska, shaqaalaha arimaha bulshada.  Haddii uu kugu dhaco ama uu hadda kugu dhacaayo SGBV, usheeg qof aad kukalsoon tahay ama laxariir ururada kor kuqoran.

### CAAWI dadka kale inay badbaado helaan sidoo kale

Haddii qof ay kudhacday ama ay kudhacayso SGBV uu gurmad kuusoo doonto, dhagayso qofka oo xasuusi in SGBV uusan ahayn  khaladkooda uusana kaligiis ku hayan arinta. Usheeg inay caawimaad heli karaan kuna dhiiri gali inuu caawimaad raadsado. Hadii uu qofku aqbalo waxaad laxariiri kartaa ururada kor kuqoran adoo qofka kaashanaaya.

gaarsii qofksta buug yarahaan iyo muuqaalkaan si aad u lawadaagto dad badan!

https://youtu.be/JU6MvCfcYD8

IOM UN MIGRATION

## MACLUUMAAD NAGU SAABSAN

Mashruuca PROTECT (DIFAAC) wuxuu diirada saaraaya xoojinta adeegyada taageerada heer qaran ee lasiinaayo dhibanayaasha rabshada kusalaysan faraxumeynta iyo dhalshada. PROTECT wuxuu sidoo kale diirada saaraayaa in adeegyadaan loofuro dad ka qaxootiga ku ah qurba, dadka magangalyo doonka ah iyo soogalootiga, haddii ay yihiin caruur ama dad waawayn ayna kujiraan dadka loo aqoonsado inay kamid yihiin LGBTI.

https://eea.iom.int/PROTECT-project

Waxaa aasaasay midowga Europe ee xuquuqda, sinaanta iyo dhalashada (2014-2020)

Macluumaad

# KUSAABSAN XADGUDUBKA GALMADA IYO JINSIYADA



**BUUG YARAHAAN** waxaa loogu talagalay qofka usoo haajiray Malta kana yimid wadan kale. Waxaa laga yaabaa inaad wadankaan timid adoo magangalya doon ah, am wax kabarato, ama inaad lanoolato qoyskaaga.

Wadanka Malta, ilmo KASTA wuxuu leeyahay xaquuq lamid ah dadka kale, ayadoon laga eegayn da'da, aqoonsiga jinsi, dookha galmada, luuqada, diin ama meesha qofku kayimid.

Waxaad XAQ uleedahay inaad kuraaxaysato nolol kacaagan nooc kasta oo rabshad ah. Hadii qof uu kudhibaateeyo ama kuhanjabado inuu kudhibaateeyo adigga ama qof aad taqaano, xasuusnoow inaad xaq uleedahay inaad caawimad iyo magangalyo hesho.

Kaligaa matihid. CAAWIMAAD ayaad heli kartaa.

# RABSHADA KUSALAYSAN GALMADA IYO JINSIYADA (SGBV)

## Waa maxay SGBV?

RABSHADA KUSALAYSAN GALMADA IYO JINSIYADA (SGBV) waa ficil kasta oo qof lagula kaco ayadoon qofku bixin ogolaansho, kaasoo kusalaysan dhaqanada jinsiga iyo xariirada awooda aa iskudheeli tirnayn. Waxaa kujira ficilada keeni kara dhibaatada ama waxyeelada falgac meed, kufsi, dhegahadal, dhimirka ama dhaqaale. Danbiilayaashu waxay badanaa adeegsadaan awood, caga juglayn, khiyaano ama maskax kaxadis. Inta badan SGBV lama aqoonsado ama lamasoo sheego.



## Waa maxay noocyada ugu badan ee SGBV?

SGBV wuxuu noqon karaa mid fal gacmeed ama dhega hadal, ama, qaabab kale, wuxuu naqan karaa sidan oo kale:

- RABSHADA QOYSKA - waa rabshad kadhex dhacda guriga ama qoyska uma dhaxaysa dadka isqaba ama xubnaha kale ee qoyska.
- RABSHADA LAMAANAHA ISQABA - waxay kadhex dhacdaa lamaanayaasha (isqaba, wadanool, wiilka saaxiibka ah/gabadha saaxiibtaada ah ama xariiro kale oo iskudhaw) ayna kujiraan gardaro gacan qaad ah, lagugu qasbo galmo, aflagaadho iyo xakamaynta nolosha qofka kale.
- XADGUDUBKA DAREEN - waxaa kamidah dhibaatoyika sida in lagu ciilo oo ay kujirto hanjbaado jirdil ama rabshad galmo, handadaad, bahdilid, takoorid , dabagal, dhibaatayn afka ah, dareen aan loo baahanyn, hadalo, iljabin ama erayo qoraal ah oo laxariira galmo iyo/ama hanjabaad ah.
- WEERAR JIRKA AH - waa rabshad ay kujiraan wax kudhafasho, dharbaaxid, hantaaturayn, goyn, xiirid, gudbid, toogasho ama ficil kasta oo kale oo keenaaya xanuun, raaxo la'aan ama dhaawac.
- XADGUDUB GALMO - waa fal toos udhaca ama hanjabaad gacan qaad ah oo laxariirta galmo, hadii ay tahay mid qofka lakufsado ama xaalad aan sinaan lahayn ama handadaad ah.
- DHIBAATADA GALMADA - Qof ayaa si kas ah sabab galmo awgeed utaabanaaya qofkale asagoon qofkaasu ufasixin, ama jir ahaan kuqasbaaya qof inuu galmo lasameeyo asagoon qofku doonayn.



- WEERAR GALMO – waa ficil uu qof ku kuqasbo qof kale inuu galmo lasameeyo asagoon qofku doonayn.
- DANBIGA NACAYBKA KUDHISAN – waa nacayb kudhisan urur ama jinsiyad oo yimaada marka danbiiluhu qofka kubeegsado sabab laxariirta inuu xubin kayahay koox gaar ah oo bulshada kamid ah ama jinsiyad gaar ah sida rabshada kadhanka ah dadka loo aqoonsado inay yihiin LGBTI (dumarka dumarka u galmooda ,raga raga ugalmooda ama noocyada kale ee raga iyo dumarka u wada galmood, labeebshaha, khaniiska ).

## Waa maxay noocyada kale ee SGBV ee jira?

Waxaa jiro noocyo kale oo badan oo SGBV ah ayna kujiraan:

GUURKA ILMAHA/GUURKA XILI HORE – marka labo qof midkood ama labaduba ay kayar yihiin da'da 18 sano jir.

GUUR QASAB AH – marka labo qof midkood ama labada qofba aysan shaqsiyan udooran ogolaanshahooda buuxa ee xorta ah si ay iskuguursadaan.

GUDNIINTA GABDHAHA/ XUBNO JARISTA – jarista qayb ahaan ama gabi ahaan xubinta taranka ee gabdhaha ama dhaawac kale oo loo gaysto xubnaha taranka haweenka sababo kabaxsan kuwo caafimaad.

DANBIGA SHARAF DHAWRKA – waa falalka rabshada ah, caadiyana dilka qof, oo ay gaystaan ragga lagulana kaco dhediga oo loo aqoonsado inay ceeb usoo jiideen qoyska.

DHOOFINTA DADKA – waa kaganacsiga dadka oo ay kujirto in xoog lagusoo kaxaysto, lakhiyaano, ama loo hanjabo si loohelo nooc shaqaale ama fal kaganacsiga galmada ah iyo/ama noocyada kale ee kafaaiidaysiga dadka tabarta yar.

## Waa maxay ogolaansho galmo?

Oggolaansho galmo waa inaad ogolaato inaad qof iskugalmootaan. Fal galmo oo aan qofku ogolaan waxaa loo aqoonsanayaa xadgudub galmo. Oggolaanshaha galmada oo faahfaahsan markasta waxaa qofku kubaxshaa si ikhtiyaarkiis ah. Oggolaansho mabixin karo qof saqraansan oo cabay khamri ama daroogo ama qofksta aan dhimirkiisu dhameytirneen oo adigga masuul kanaqonaaya. Waxaa jiro xiliyo aan ogolaanshuhu macquul ahayn sababo laxariira naafooyin dhanka jirka ama garaadka ah. Xasuusnoow: markasta waad badali kartaa go'aankaaga, xataa hadii aad horay u aqbashay inaad fal galmo samayso.

## Waa maxay farqiga udhaxeeya jinsiga, nooca qofka iyo aqoonsiga jinsi?

Qofka jinsigiisa waxaa lagu aqoonsadaa sifooyinka noole ee qofka lasiiyo marka uu dhasho, halka nooca qofku yahay lagu saleeyo sida bulshadu aaminsan tahay in qofkaas udhaqmo (sida ay tahay inay dharka uxirtaan naftoodana umuujiyaan, waxa doorarkooda iyo waajibaadkoodu noqonaayo, iwm.) si waafaqsan jinsigooda dhalasho.

Aqoonsiga Jinsi ee qofka waxaa looga jeedaa dareenka uu shaqsiyan aaminsan yahay qofkasta iyo khibradiisa shaqsiga ah ee jinsiga. Tan ayaa waafiqi karta ama kaduwanaan karta jinsiga qofka lagu aqoonsado markuu dhasho, ayna kujiraan dareenka shaqsiga ah ee jireed (kaasoo ay kujiri karaan, hadii qofku iskiis udoorto, inuu wax kabadalo qaab muuqaalka jirkiisa ama shaqada jirkiisa asagoo adeegsanaaya nidaam caafimaad, qaliin ama qaabab kale) iyo fikradaha kale ee ku aadan jinsiga, ayna kujiraan labiska, hadalka iyo qaabka dhaqanka qofka.

## Yay kudhici kartaa SGBV?

SGBV waxay kudhici kartaa QOFKASTA marnana maaha wax uu sababteeda leeyahay qofka dhibanaha ah. Haweenka iyo ragga, gabdhaha iyo wiilasha, dadka waawayn iyo caruurta, ayna kujiraan dadka katirsan LGBTI (dumarka dumarka u galmooda ,raga raga ugalmooda ama noocyada kale ee raga iyo dumarka u wada galmood ama labeebshaha,khaniiska.) ayaa dhamaantood noqon kara dhibanayasha SGBV. SGBV maaha wax marna qiil loosamayn karo.

## Yaa samayn kara rabshadaha SGBV?

QOFKASTA ayaa samayn kara SGBV. Rabshad sameeyuhu wuxuu noqon karaa qof aadan waligaa arag ama qof aad taqaano, sida xubin qoyskaaga kamid ah, saaxiib ama lamaanaha aad is lanooshihiin.

## Xagee ayay SGBV kadhici kartaa?

SGBV wuxu dhaci karaa MEELKASTA: wadankaaga hooyo, intaad kujirtay safarkaaga aad kutagaysay wadan kale, iyo wadanka aad hadda kunooshahay. Wuxuu kadhici karaa guryaha gaarka ah iyo goobaha dadwaynaha, sida goobaha waxbarashada iyo xarumaha soo dhawaynta.

## SGBV gu ma wax aan anigu sabab u ahay baa?

SGBV MARNA maaha khaladka dhibanaha. Dhaqanada jinsiga iyo xariirada awoodeed ee aan iskudheeli tirnayn ayaa ah sababaha ugu wayn ee keena SGBV. Qofka danbiga gaysta ayaa ah kan kaliya ee eeda qaadaaya.

## Maxaa dhacaaya hadii aanan kadagaalamin falka?

Waa wax aad ubadan inaan qofku kafalcelin inta weerarku socdo waayo waxaa laga yaabaa inaad cabsooto aadna dareento rajo la'aan ama inaad dabin kujirto mana taqaanid wax aad samayso si aad uga baxdo xaalada aad kujirto. Tani kama dhigna inaad oggolaaday in rabshad laguu gaysto.

## Waa maxay cawaaqiibyada kadhan kara SGBV?

SGBV wuxuu kugu reebi karaa laba cawaaqib dhanka jirka ah iyo mid dhanka dareenka ah. Jir ahaan, asagoo ay lasocdaan cawaaqibyo kale, SGBV wuxuu keeni karaa waxyeelo jireed, xanuun, caabuqyo iyo uur aadan doonayn. Cawaaqibyada dareen ee SGBV waxaa kujiri kara dhakaaryoow, qaraw cabsi leh, hurdo la'aan, madax xanuun, iyo noocyo badan oo kaladuwan oo dareeno ah sida xanaaq, ceeb, murugo, danbiile nimo, ama cabsi. Malta waxay leedahay adeegyo xirfadeed oo qarsoodi ah si loo taageero dhibanayaasha. Kaligaa MA tihid.

Xataa haddii aad kaso maqan tahay guriga aadna aaminsan tahay inay hawshu kali kugu tahay, ma tihid kaligaa caawimaad ayaadna heli kartaa.

**XASUUSNOOW!**

QOFKASTA ayaa noqon kara dhibane SGBV loo gaysto

SGBV markasta waa MID AAN LA AQBALI KARIN

SGBV MARNA maaha khaladka dhibanaha

Waxaad codsan kartaa CAAWIMAAD



# ADEEGYADA LAHELI KARO


## Maxaan samaynayaa haddii Anigga ama qof Aan aqaano lagula kaco ama uu marqaati kanoqdo SGBV?

Haddii ay kugu dhacdo, in aad goobjoog unaqoto, ama aad kashakido jiritaanka SGBV waxaad usheegi kartaa qof qoyskaaga kamid ah, qaraabo ah ama qof kale oo wayn ood kukalsoon tahay.

Waxa sidoo kale jiro dadkale oo kucaawin kara qaab qarsoodi ah, sida macalimiinta, shaqaalaha Bulshada, saraakiisha booliiska iyo dhakhaatiirta.

Hadii aad horay ugu xirnayd urur taageero siiya soogalootiga iyo magangalyadonta, hakadaahin inaad caawimaad kadalbato.

## Maxaan samayn karaa hadaan khatar degdeg ah ugu jiro iyo/ama aan ubaahanahay caawimaad degdeg ah?



Wac nambarka taleefanka 112 si aad ula xariirto adeegyada degdega ah ee Ciidanka Booliiska Malta iyo Gurmadka Degdeg aha.

Wicitaanka iyo adeegyada waa kuwo bilaash ah waxaadna heli kartaa 24 saac maalintii, 7 maalmood asbuucii, maalin kasta sanadkii.



Hadii aad kunooshahay mid kamid ah xarumaha furan ee ay maamusho AGENCY FOR THE WELFARE OF ASYLUM SEEKERS (AWAS, WAKAALADA FAYA DHAWRKA DADKA MAGANGALYO DOONKA AH), waxaad markasta waydiin kartaa qofka masuulka kaa ah ama qof kamid ah shaqalaaha inuu kucaawiyo.

Wadanka Malta, xirfadle kasta waa inuu laxariiraa Booliiska hadii dhibaato loogaysto ilmo caruur ah.

## Waa maxay adeegyada kale ee laheli karo?

Waxaad sidoo kale wici kartaa LAYNKA CAAWIMAAD EE QARAN: 179

Laynkaan waa mid 24 ka saac shaqeeya oo bilaash ah, qarsoodi ah macluumaadka aad kubixisana gaar kuuyihiin. Luuqadaha lagu hadlo waa Maltese iyo Ingiriis; waxaad dalban kartaa turjumaan.

Waxaad booqan kartaa KELLIMNI.COM -

oo ah adeeg taageero oonleen ah bixiya (oo kuqoran Ingiriis iyo Maltese) looguna talagalay dhalinta iyo dhalin yarada qaangaartay kaasoo ah mid bilaash ah, qarsoodi ah oo macluumaadka aad bixiso adigga gaar kuuyahay. Waxaad qof kula hadli kartaa wada sheekaysi toos ah oo qof iyo qof ah, waxaad diri kartaa iimeel adoo adeegsanaaya webseetka ama waxaad soo dagsan kartaa Appka.

Waxaad laxariiri kartaa GBVSO/VIOLET SUPPORT ONLINE (TAAGEERADA VIOLET EE OONLEENKA AH)

ood kahelayso www.vso.org.mt – waa adeeg qarsoodi ah oo bilaash ah oo iimeel iyo wada sheekaysi ah looguna talagalay qofkasta oo dhibane u ah rabshad kusalaysan galmo iyo jinsiga kuna baxa luuqado kaladuwan

Waxaad codsan kartaa caawimaad xataa hadii aadan kuhadlin Ingiriis ama Maltese ama aad kaliya kalsooni kuqabto kuhadalka luuqadaada hooyo.

Isbitaalada, booliiska, shaqaalaha bulshada, xarumaha soodhawaynta iyo qolyaha kale ee adeegyada baxsha ayaa awoodi kara inay kuuqabtaan turjumaano kaacaawin kara helitaanka caawimaada aad ubaahantahay.

